IIB MAGALE

# FAAFINTA RASMIGA AH

الجريــدة الرسميــة

Sannadka 15aad Muqdisho, 1da Feb. 1987 Lr. 2

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

**QIIMADU**: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA**: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 4 ee 1 Jan. 1987, Oggolaansho Miisaaniyadda ku talo galka ee Dawladda ee Sannadka 1987. BOG. 79

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 3 ee 15 Jan. 1987 Tariifada Khidmadda Nootaayada » 80

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 4 ee 3 Jan. 1987 Laalid xil » 85

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, L. 6 ee 12.12.86, Magacaabid Guud/ye iyo Gudd/ye ku xigeen Golaha Sh. Degaanka. » 87

# QAYBTA LABAAD
## XEER

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 3 ee 15 Jan. 1987 Tariifada Khidmada Nootaayada.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S. Qodobkiisa 82 (14) iyo 111 (2).

ISAGOO ARKAY: Qodobka 69aad ee Dastuurka J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Sharciyada Nootaayada ee Lr. 8 ee 15.2.61 iyo Lr. 1 ee 2.3.1962.

ISAGOO ARKAY: Sharciga Mihnada Nootaayada ee Lr. 7 ee 2.2.1986 qodobkiisa 4aad.

ISAGOO TIXGELIYEY: Talada uu soo jeediyay Wasiirka Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Soo Socda.

Qodobka 1aad

Khidmadda ay xaq u leeyihiin Nootaayayaasha hawlaha ay qabanayaan, waxay u kala baxayaan,

1) Khidmo Go'aan ee qoraallada aan la qiimeyn karin.

2.) Khidmo ku dheeli tiran qoraalada qiimaysan.

3.) Khidmada Saacadaha (dheeraadka ah).

4.) Khidmadaha Nuqullada, Shahaadooyinka, soo koobidda, ku qorista iyo ka minguuridda Diiwaanka Reboortooriyada.

5.) iyo Khidmadaha kale uu Sharcigu oggolaado.

Qodobka 2aad

KHIDMADAHA

Khidmadda go'an waxay u kala baxdaa sida soo Socota:

b) Wakaalad Guud Sh.So. 200

t) Wakaalad Gaar ahaaneed Sh.So. 180

j) Keydinta qoraalada iyo Dekumentiga Sh.So. 150

x) Keydinta dardaaran qarsoodi ah Sh.So. 140

kh) Keydin dardaaran Gacan ku qoran Sh.So.130

d) Qoraalada kale ee aan lagu xusin Xeerka Sh.So. 100

Qodobka 3aad

KHIDMADA KU DHEELI TIRAN QODOBADA QIIMEYSAN

Qoraal kasta oo ku saabsan kambiyaale dhacay caba

| | | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| ilaa | | Shs. | 100 | | | Shs. | 10/= |
| laga bilaabo | | » | 100 | ilaa | 1.000 | » | 20/= |
| » | » | » | 1.000 | ilaa | 5.000 | » | 30/= |
| » | » | » | 5.000 | ilaa | 10.000 | » | 40/= |
| » | » | » | 10.000 | ilaa | 20.000 | » | 60/= |
| » | » | » | 20.000 | ilaa | 50.000 | » | 100/= |
| » | » | » | 50.000 | ilaa | 100.000 | » | 120/= |
| » | » | » | 100.000 | ilaa | 500.000 | » | 150/= |
| » | » | » | 500.000 | ilaa | 1.000.000 | » | 200/= |
| » | » | » | 1.000.000 | iyo wixii ka dambeeya | | | 250/= |

Dhigaal (Deposito) ka kooban lacag caddaan ah iyo han tida kale ee qiimaha leh wuxuu Noohaayuhu ku yeelanaa khidmad dhan kunkiiba laba.

Qodobka 4aad

Qoraallada iyo heshiisyada ku saabsan kala wareegidda hanti ma-guurto, qiimaha hantida heshiisyada Shirkadeed oo cayn kasta ah iyo wada lahaansho hantiyeed, qiimaha hanti-da lagu shirkoobayo ama la wada yeelanayo; isku darid, qii-maha guud ee hantida iyo keydka Shirkadaha la isku dara-yo, haddii Shirkadaha la isku darayo middoodii ay midda kale la mdidoobeyso kana noqoneyso; hantida iyo keydka guud ee Shirkadda oo midda kale la midoobeyso; qoraalada shirarka shirkadaha ku saabsan hanti kordhin ama soo saa-rid qiraallo deyn Shirkadeed (Obbligazione), qiimaha hanti-dii hore lagu soo kordhinayo, ama qiimaha guud ee qoraala-da ku saabsan hanti kala qaybsasho; qiimaha guud ee hanti-da la qaybsanayo; qoraalada ku saabsan xuquuq ama hanti is dhaafin ama isugu bedelid (transazione), qoraallada ku saabsan dhisid xuquuq la xiriira intifaaca, isticmaalidda iyo midjdiinnimo, dhuleed (servitu prediali); raxan, alaab isku bedelid (permuta); xaraash Maxkamadeed, enfiteeusi, iyo qoraallada kale ee ku saabsan xuquuqda ee lahaanshaha (diritti possessori) ama dhammaanad, waxaa looga qaadayaa khidmadaha soo socda:

| | | | |
|---|---|---|---|
| b) | Qiimo ilaa 10.000 | —— | 2% |
| t) | 10.001 | ilaa 25.000 —— | 1% |
| j) | 25.001 | ilaa 50.000 —— | 0.50% |
| x) | 50.001 | ilaa 100.000 —— | 0.30% |
| kh) | 100.001 | ilaa 500.000 —— | 0.15% |
| d) | 500.001 | ilaa 1.000.000 —— | 0.05% |
| r) | 1.000.000 | ilaa wixii ka badan —— | 0.03% |

Qodobka 5aad

Khidmada boqolayda ah ee ku xusan Qodobka 4aad wa-xaa laga dhigayaa nus marka Noohaayuhu uu qabto hawla ha soo socda:

b) Kala wareejinta hantida guurtada ah iyo hantida kale oo guurtada ah ee diiwaan gashan;

hanka iyo kirada xamuulka guud ahaan;

j) Qoraaljada ku saabsan iskaashatooyinka guud ahaan.

Qodobka 6aad

Khidmadda laga qaadayo qoraallada ku saabsan isdhaaf-siga hantida guurta iyo maguurtada waxaa loo raacayaa khidmadooda mida qiimo badan.

Kala wareejinta ay ku wada jiraan hanti ma-guurto iyo guurto ah waxaa loo raacayaa khidmadda mid kasta u gaar-ka ah.

Qodobka 7aad

Arrimaha aan lagu xusin qodobbada kor ku tilmaaman, khidmadda laga qaadayo waxaa looga qiyaas qaadanayaa kuwa ay isku midka yihiin (casi simili).

Qodobka 8aad

KHIDMADDA SAACADAHA DHEERAADKA

Qoraallada ku saabsan liiska tirakoobka xisaabaadka (inventario) iyo qaybinta hantida, iibka Maxkamadaha (ven-cite giudizarie) furitaanka iyo faafinta dardaaranka sirta ah, waxaa laga qaadayaa khidmo dhan Sh.So. 120 labada saacadood ee hore iyo Sh.So. 50/= saacad waliba ee dambe, hase yeeshee marna kama badnaan karto Sh.So. 300/= maa-lintiiba.

Qodobka 9aad

KHIDMADDA NUQULADA IYO SHAHAADOOYINKA

Bixinta nuqullada iyo shahaadooyinka nootaayada wa-xaa laga qaadayaa khidmad go'an oo ah Sh.So. 20/=.

Wixii ka baxsan qoraallada ku xusan qodobbada kor ku tilmaaman waxaa laga qaadayaa khidmadda hoos ku qoran:

b) Kambiyaale dhacay oo laga soo dacwooday — Sh.So. 5/=;
t) Qoraallada kale: So.Sh. 20/= boggiiba.

Qodobka 10aad

Nootaayaha wuxuu xaq u leeyahay in loo celiyo kharaka galaynta, ku muujinta diiwaanka Rebortooriyada ee qoraal-lada uu isagu sameeyey, sida soo socota:

Qodobka 11aad

Nootaayayaashii horay ugu shaqaynayay Dowladda ee Madax-bannaanaaday 1dii Abriile 1986 waxay xaq u leeyihiin laga bilaabo 1.4.1986 ilaa 31.12.1986 in dib loogu celiyo kharajkii adeegga ee ay ku fuliyeen hawlaha Nootaayada iyo 3% ee dakhligii ay soo xareeyeen.-

Qodobka 12aad

Waxaa ka reeban Nootaayaha inuu qaato khidmad ka baxsan taa ku qoran Xeerkan.

Qodobka 13aad

Waxaa la tir-tiray Sharciyada iyo Xeerarka hoos ku qoran iyo wixii Sharci ah oo soo horjeeda ama aan la socon karin Xeerkan:

1 Xeerka Lr. 99 ee 3.04.1972
2. Xeerka Lr. 42 ee 16.05.1981
3. Xeerka Lr. 8 ee 25.12.1972
4. Xeerka Lr. 16 ee 2.07.1972.

Qodobka 14aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa laga bilaabo 1.1.1987, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.-

Muqdisho, 15 Jan. 1987

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)